


Xog iyo Khayraad loogu talo galay Kiraystayaasha inta lagu gudo jiro COVID-19



Joojintii Ku meel gaadhka ahayd ee Guri ka saarida waxa ay dhamaan doontaa 24ka Luulyo, 2020

HADDII AAD LA KULANTAY QASAARO DAQLI,
LA HADAL PHA GAAGA SIDA UGU DHAKHSIYAHA BADAN SI LAGAAGA DHIMO QIIMAHA KIRADA



Ka hortagga Ka saaridda guriga Haddii lacagta

➤ **Miyaan helayaa ogeysiinta igu wargelineyso inaan guriga ka baxo haddii aan kirada bixin waayo ka dib 24ka Luulyo, 2020?**

Haa. Haddii joojinta guri ka saarista ku meel gaarka ah ay dhaafsiisantahay taarikkhdan marka la eego sharciga gobolka ama maxalliga ah, laga bilaabo 25 Luulyo, 2020, PHA gaaga ama mulkiilaha gurigaaga wuxuu ku siin karaa ogeysiinta guri kasaarida haddii aadan bixin kirada ama waxaa lagu bilaabi karaa qorshe aad lacagta kirada dib ugu bixiso. Sharciga federaalka sida waafaqsan xeerkaa CARES wuxuu sheegayaa in ogeysiinta guri kasaarida ee la bixinaya dhammaadka muddada ku meel gaarka ah inay siiso kireystaha ugu yaraan 30 cisho si uu guriga uga baxo, laakiin waxa laga yaabaa in muddo ka dheer intaan laga codsado inuu bixiyo mulkiilaha marka la eego sharciga gobolka ama maxalliga. Haddii aad hesho ogeysiis guri ka saaris ah, waa inaad raacdo habka maxalliga ah ee guri kasaarista. Haddii aad dareemeysid in si qalad ah lagaaga saaray guriga kirada ah, la xiriir ururka maxalliga ah ee caawimada sharciga ah ama hay'adaha adeegyada bulshada. Haddii aad xubin ka tahay mashruuca Voucher, waxaad la xiriiri kartaa oo kale PHA ga maxalliga ah. Haddii aad xubin ka tahay dadka daggan guryaha dawladda, waxaad xaq u leedahay inaad furato habka dib u eegista cabashooyinka sida ku qayaxan heshiiskaaga.

➤ **Maxaan sameyn karaa si aan ugu hortago in guriga layga saaro haddii kiro aanan bixin wakhtigeedina la joogo?**

Kirada weli waa laguugu leeyahay waana ay isku aruurtay haddii aan la bixinin. Haddii ay jirto kiro aadan bixin, la xiriir PHA gaaga sida ugu dhakhsiya badan si laguugu tixgeliyo midkamid ah ikhtiyaaradaan hoos ku xusan:

- (1) Haddii uu **yaraaday dakhligaaga ama isbeddeshay xaaladaada** oo kugu adkeysay inaad kiradii bixiso wakhtigeedii, kala hadal PHA gaaga inuu dib u saxo dakhligaaga.
 - ✓ Haddii aad xubin ka tahay guryaha dawlada iyo kuwa mashruuca Voucher, PHA gaaga wuxuu dib u eegayaa dakhligaaga wakhti xaadirkan waxaana uu dib ugu fadhiisinayaa kirada ay tahay inaad bixiso tan oo ka turjumeysa isbedelka kugu dhacay.

- **Talo!** Haddii isbedelka ku dhacay dakhligaaga aan loo soo sheegin si dhakhsi ah, weydii PHA gaaga xeerkooda ku wajjahan sixidda kirada wakhtigii la soo dhaafay (qaar ayaa laga yaabaa inay oggolaadaan, qaarna inaanay oggolaan).
 - ✓ Waxaad kaloo weydiin kartaa PHA gaaga haddii aad xaq uleedahay in gebi ahaanba lagaa daayo kirada tan ugu yar ee ay tahay inaad bixiso marka aad dhib wajahdo. PHAs yada oo dhammi waxay ku amran yihiin inay kiro ka dayn u sameeyaan haddii dhaqaale xumo dhacdo. Waxaad dib u eegis ku sameyn kartaa Xeerarka Dajinta iyo Sii Dagganaanshaha PHA ga ama Qorshaha Maamulka si aad u hesho xog ku saabsan xeerka maxalliga ah ee PHA ga ee ku wajjahan kiro ka daynta marka dhaqaale xumo qofka soo wajahdo, ama waxaad toos ula xiriiri kartaa PHA ga.
- (2) Xubnaha daggan guryaha dawlada iyo kuwa qayb ka ah mashruuca Voucher ka waxay ikhtiyaar u leeyihiin inay bixiyaan kiradii hore loogu lahaa hal mar 24ka Luulyo, 2020. PHA ga iyo mulkiilaha guriga kirada kaama qaadi karaan lacag dulsaar ah ama riboba kirada ah tahay inaad bixiso bisha Abriil, Maayo, Juun, iyo Luulyo 2020 ka.
- (3) Haddii aadan bixin karin kirada laguugu leeyahay hal mar, waxaad weydiisaa PHAg ama mulkiilaha guriga kirada (haddii aad xubin katahay mashruuca Voucher) haddii aad geli karto **heshiis dib ubixinta** wixii kiro ha ee laguugu leeyahay. *Ka eeg hoos xog dheeraad ah oo ku saabsan heshiis dib ubixinta lacagta.*
- **Talo!** \$ 1200 + Lacagta Federaalku Bixisay Dhaqaalaha Hoos udhacay awgii (stimulus payment) MA AHA mid lagu darayo xisaabinta dakhligaaga. Lacagtaan waxaa loo isticmaali karaa inaad iskaga bixiso kirada laguugu leeyahay. Ku dhawaad dhammaan dadka daggan U.S. ee ah muwaadiniin iyagau waxay xaq u leeyihiin lacagtani. Haddii aadan helin lacagtii taageerada ahayd ee ay dawlada bixineysay, fadlan booqo barta internetka si aad u ogaato in lacagtii lagu siiyay iyo in kale oo buuxi foomka: <https://www.irs.gov/coronavirus/get-my-payment>.
 - **Talo!** \$600 ee dheeraadka ah ee isbuuciiba mar la bixinayo ee sida ku meel gaarka ah loo siinaayay dadka shaqada la'aanta ah tan oo uu sharciyeeyay sharciga CARES MA AHA mid lagu darayo xisaabta dakhligaaga. Haddii aad heshay lacagtaan dheeraadka ah, waxad u isticmaali kartaa inaad iskaga bixiso kirada laguugu leeyahay. Haddii aad weyday shaqadaadii oodan dalbanina Kaalmada lacageed ee Shaqo la'aanta, waxaad xog dheeraad ah ka heli kartaa sida loo dalbado kaalmada shaqo la'aanta halkaan: www.usa.gov/unemployment; www.careeronestop.org/LocalHelp/UnemploymentBenefits. Xasuu now: \$600 ee dheeraadka ah ee isbuuciiba mar la bixinayo ee sida ku meel gaarka ah loo siinaayay dadka shaqada la' tanoo uu sharciyeeyay sharciga CARES waxay dhammaanayaan 31ka Luulyo, 2020 hadda haddii aad dalbatid ma heleysid kaalmayntaan lacageed ee dheeraadka ah, laakiin waxa laga yaabaa inaad xaq u yeelato caymiska joogtada ah ee shaqo la'aanta.
- (4) PHA gaaga waxa laga yaabaa inuu ka war hayo **meelo maxalli ah** oo kaa caawin kara kirada, korontada, biyaha, iyo baahiyaha kale ee asaasiga ah ee guriga. Waxa kale oo aad la hadli kartaa 211 taleefonkaad doonto adoo ka garaacaya ama waxaad booqan kartaa 211.org xog si aad uga hesho kaalmaynta dhaqaale ee degdegga ah. Fadlan waxaad eegtaa oo kale qaybta adeegyada iyo illaha oo ku jirto dhammaadka qoraalkaan si aad u hesho liis ciwaano aad heli karto.

➤ **Maxaa uu yahay heshiis dib ubixinta maxayna noqoneysaa shuruudaha lagaga hortagayo guri ka saarista?**

Heshiiska dib u bixinta waa heshiis qoran oo saxeexan kaasoo dhex maraya adiga iyo PHA ga (marka aad xubin ka tahay guryaha dawladda) ama mulkiilaha guriga kirada ah (marka aad xubin ka tahay mashruuca Voucher ka) tanoo xisaabinaysa lacagta kirada ah ee laguugu leeyahay iyo xaddiga lacageed ee aad bixinayso bil kasta iyo inta bilood ee aad ku bixinayso (tusaale ahaan waxa laguugu leeyahay \$500 waxana aad heshiis ku galaysaa inaad bixiso \$50 oo dheeraad ku ah lacagtii kirada ee aad bixinaysay bil kasta 10 bilood gudahood). Inaad gasho heshiis dib ubixineed waa mid ay go'aaminyaan PHA ga ama mulkiilaha guriga

kirada. La habzaamida iyo bixin la'aanta lacagta heshiiska dib ubixinta ku xusan waxay keeni kartaa in gabi ahaanba lagaa saaro guriga aad ku jirto ama/iyo caawimo. Qofka xubin ka ah guryaha dawlada, shuruudaha dib ubixinta lacagta waxaa lagu qeexayaa Xeerka Dajina iyo Sii dagganaanshaha PHA ga iyo heshiiska dib ubixinta ee qoran. Qofka xubinta ka ah mashruuca Voucher ka wuxuu u baahan yahay inuu toos ula gorgortamo mulkiilaha guriga kirada ah si laysugu raaco shuraadaha dib ubixinta lacagta.



Xogta COVID-19 & Walaacyada Badbaadada

➤ **Maxay tahay inaan sameeyo haddii layga helo cudurka COVID-19?**

PHA gaaga wuxuu uu ka dalbi karaa inaad kusoo wergelisid haddii lagaa heli cudurka ama haddii aad la kulantay qof laga helay cudurka si faafitaanka cudurka looga ilaaliyo kiraystayaasha kale iyo shaqaalaha. Ma aha mid qassab kugu ah inaad usheegto PHA gaaga ama mulkiilaha guriga kirada ah haddii lagaa helo cudurka. Haba se ahaatee, xogtaan inaad la wadaagto shaqaalaha waxay ka ilaalin kartaa cudurka shaqaalaha iyo dadka kale ee aad la kulantay.

➤ **Miyaan xaq u leeyahay inaan ogaado haddii kiraystayaasha kale laga helay cudurka COVID-19?**

PHA gaaga kuma qasbana inuu adiga kuu sheego qof laga helay cudurka COVID-19. Haba se ahaatee, qaar ka mid ah PHA yada waxa laga yaabaa inay ogaysiiyaan kiraystayaasha kale haddii qof ku nool dhismaha laga helo cudurka COVID-19.

➤ **Ka warran haddii aan su'aal ama werwer ah ka qabo maaraynta iyo dayactirka agabka?**

Waa inaad kala xiriirtaa PHA gaaga ama mulkiilaha guriga kirada aha werwer ah ee ku wajjahan codsiyada maaraynta iyo dayactirka agabka. U rogaal celinta codsiyada aan iyagu ahayn degdegga waxa laga yaabaa in la yareeyo ama dib loo ridoba. PHA yada qaar ayaa xiray xafiisyadoodii si loo yareeyo faafitaanka COVID-19, laakiin waxaad ku heli kartaa taleefon, iimayl, ama bartooda khadka tooska ah. Xafiisyada qaar ayaa yareeyay taageeradii qof ka mid ahi uu kuu samaynayay ama waxa laga yaabaa inay kaliya tixgelinayaan xaaladaha degdegga ah. Hubi haddii wax farriimo ah lagu dhajiyay dhismahaaga ama xafiiska maamulka dhismaha si aad u hesho xog dheeraad ah.

➤ **PHA ga miyaa uu ku amran yahay inuu si xirfadaysan unadiifiyo qaybta aan dhismaha ka dagganahay haddii qof ka mid ah cudurku ku dhaco?**

May, PHA gu wuxuu ka mas'uul yahay nadiifinta meelaha la wadaagaayo adiguna waxad ka mas'uul tahay inaad nadiifiso qaybta aad ka daggantahay dhismaha.

➤ **Sidee ayuu u caawin karaa kiraystayaasha Golaha Deegaanka wakhtigaan lagu gudo jiro?**

Golaha deegaanku wuxuu kaa caawin karaa arrimaha la xiriira COVID-19 iyaga oo markaasi la shaqaynaya hay'adaha maxalliga ah si ay dagganayaasha u siiyaan tababaro iyo caawimooyin, usameeyaan sahamin iyo xogna uga ururiyaan dagganayaasha ku saabsan arrimaha COVID-19 ee ay tahay in la ogaysiiyo PHA ga iyo in laysu geeyo liis tiro koobaya khayraadka maxalliga ah. Golaha deegaanku waxa kale oo uu u isticmaali karaa maalgelinta kiraystayaasha in uu soo iibiyo teknoolojiyada saamaxaysa in lagu wada shiro fiidiyow (sida

Zoom) si ay u qabtaan shirar iyo tababaro iyago isticmaalaya teknoolojiyadaa iyo adeega udirka farriimaha tiro badan oo dad ah si loola wadaago xogta mihiimka ah (sida Twilio, Simpletexting, or eztexting).

➤ **Ka warran haddii aan buuxin waayo Sharuudaha Adeegga Bulshada iyo Isku Filnaanshaha (CSSR) ee loogu talo galay dadka daggan guryaha dawlada COVID-19 awgii?**

CSSR kaliya waxa loogu talo galay dadka daggan guryaha dawladda, loogumana talo gelin dadka qaybta ka ah mashruuca Voucher. PHA gaaga waxa laga yaabaa inuu iskaba dhaaf shuruudaha ay tahay inaad buuxiso si aad u hesho adeega bulshada inta lagu gudo jiro COVID-19. Weydii PHA gaaga haddii uu iska dhaafay shuruudahaasi oo la xiriir shaqaalaha u adeegida dagganayaasha ee PHA ga ama isku duwayaasha adeega si ay kaaga caawiyaan inaad hesho adeegga bulshada iyo waxqabadyada isku fillaanshiyaha iyo sidii aad qayb uguna noqon lahayd.

➤ **Ma ka codsan karaa kormeerayaasha inay xirtaan qalabka shakhsiga ah ee laysku ilaalinaayo inta aanay soo gelin qaybta aan dagganahay?**

Haa, haddii aadan ku qanacsanayn in shaqaalaha PHA gu soo galaan gurigaa bilaa PPE, sida maaskaro ama wax daboolaaaya wejiga, fadlan si qurux badan u weydiiso shaqaalaha PHA ga inay tahay inay raacaan hagista CDC du ay soo jeedisay iyo talaabooyinka ay soo jeediyeen hoggaamiyayaasha caafimaadka ee gobolka ama maxalliga ah.



Ka ilaalinta Xadgudubyada Guryaha iyo kuwa Jinsiga la xiriira

➤ **Waa maxay VAWA? Miyaan se qayb ka ahay ilaalinta ay biixnayso VAWA?**

- Xeerka Ka hortagga Tacaddiga Dumarka (VAWA) wuxuu ilaaliyaa dhibbanayaasha xadgudubyada guriga, xadgudubyada is shukaansiga, xadgudubyada dhanka jinsiga iyo dabogalka (tan oo loo yaqaan “Danbiyada VAWA”).
- Ilaalintani ma ah mid uu lab ku ama dhedigu gaar u leeyahay waa mid dhammaan koobsanaysa.

➤ **Ilaalintii aan ka helaayay VAWA miyaa ay isbedeshay iskaarantiimayntii COVID-19 awgii?**

- Maya, haddii aad tahay dhibbane danbiyada VAWA, ilaalintii aad helaysay waa mid sideedi ah oon isbedelayn inta lagu gudo jiro COVID-19. Laguuma diidi karo caawimo ama caawimo aad hore uhaysatay lagaama goyn karo iyadoo sabab looga dhigaayo xadgudubyada guriga, xadgudubyada shukaansiga, xadgudubyada jinsiga, iyo dabogalka.
- Intaa waxa dheer, haddii aad dantahay dhibbane ay soo gaareen danbiyada VAWA looma tix galin karo burin heshiis oo khattar ah ama soo noqnoqaysa ama sabab fiican oo loo joojinayo caawimada, kiraysiga, ama deggenaanshiyaha. Haba se ahaatee, PHA ga ama mulkiilaha wuxuu uqiimaynayaa xaalad walba gaarkeeda marka khattar dhab ah ama mid soo socota ah ay ku iman karto kiraystayaasha.

➤ **Ka warran haddii aan u baahdo inaan guuro anigoo ka guuraya xadgudub inta lagu gudo jiro COVID-19?**

- Weli waa aad ka codsan kartaa in wareejinta degdegga ah PHA gaaga. PHA kasta wuxuu ku amran yahay inuu yeesho qorshe degdeg ah oo wareejineed kanoo qeexaya qofka xaqqa u leh, Qoraalka loo baahanyahay (haddii ay jirto), sida PHA gu uu ilaalinaayo qarsoonida qofka, iyo sida PHA gu uu u hirgalinayo codsiga wareejinta ee degdegga ah.

- **Dokumentiyoo nooc ee ah ayaan u baahanahay si aan u codsado wareejinta degdegga ah?**
 - PHA ga loogama baahna inuu codsado wax dokumentiyoo ah waxana uu aqbali karaa warbixin afka uun ah. Dokumentiyada waxy kujiri doonaan qorshaha wareejinta degdegga ah ee PHA ga.
 - Haddii dokumentiyoo loo baahdo, waxaad keeni kartaa ikhtiyaaradan soo socda kaad adigu doorbido: inaad adigu warbixin laftigaagu gudbiso ([Foomka HUD-5382](#)) **AMA** inaad keento dokumenti qof kale oo kaa caawiyay xadgudubka (shaqaale, hay'ad, ama qof si mutadawacnimo ah ubixiya adeegga caawimada dhibbanaha, qareen, ama mihnadle caafimaad) **AMA** dokumenti maamuleed (sida warbixin booliis iyo amar ka fogaanshiyo ah).
- **Ka warran haddii aan ubaahdo in qofka xadgudubayaa in uu ka baxo qaybta aan dagganahay inta lagu gudo jiro COVID-19?**
 - Xuquuqdaada VAWA waa mid ilaashan inta lgu gudo jiro COVID-19. Haddii xubin gurigaaga ka mid ah uu ku kaco fal danbiyeed toos ula xiriira VAWA danbiyadeeda, la xiriir PHA ga ama mulkiilaha si aad ula falanqayso ikhtiyaarada kuu diyaar ka ah.
- **Sidee ayaa ugu aaminsan uguna qarsoodi badan ee aan ula xiriiri karaa PHA ga mararka xadgudubaha uu yahay xubin guriga ah?**
 - Fadlan u oggoolow inuu ogaado PHA gu ogaado sida ugu aaminsan ee uu kuula soo xiriiro karo. Dhammaan xogta lala wadaagay PHA ga waa in si qarsoodi badan ku jirto loo ilaaliyaa.
- **Tan macneheedu ma waxay tahay in dhibbanayaasha VAWA aan laga saari karin guriga ku kirada ah ama laga goyn karo caawimada ay ubaahan yiin?**
 - Maya, VAWA uma diidayso PHA ga ama mulkiilaha inuu ka saaro guriga kirada ah ama joojiyo caawimada xadgudubayada aan qayb ka ahayn danbiyada VAWA. PHA ga ama mulkiiluhuu waa inuu kuula tacaamulaa kulana simaa kiraystayaasha kale. PHA ga/mulkiilaha waxa laga yaabaa inuu kaa saaro guriga haddii aad buriso heshiiska kirada si khattar ah am soo noqnoqonaysa aan sal iyo raad ku lahayn VAWA ama haddii PHA ga/mulkiilaha uu qeexi karo khattar jirta ama ku soo fool leh kiraystayaasha kale ama shaqaalaha kale.
- **PHA ga miyaa ay tahay inuu iisheego ilaalinta VAWA ee guriyaynta?**
 - Haa, PHA gaaga waa inuu kusoo ogaysiiyo ilaalinta VAWA ka hor inta aanu kuu diidin dagganaanshaha ama caawimada, marka lagu siiyo caawimo, iyo marka aad hesho ogaysiis laguugu ogaysiinaayo in lagaa joojiyay caawimada.
- **Maxay tahay inaan sameeyo haddii aan xanaaqo, aan dhibbanahay, ama doonayo inaan la hadlo qof sida ugu dhakhsiyaha badan?**
 - Si aad caawimo u hesho haddii aad waajahdo xadgudubyo kaaga imanaya dhanka lammaanaha, waxaad garaai kartaa khadka taleefonka tooska ah ee Xadgudubayada Guryaha ee Qaranka adoo ka garaacaya 1-800-799-7233 ama, dadka iyagu dhagaha li'ina, 1-800-787-3224 (TTY) or text LOVEIS to 22522.
 - Si aad caawimo u hesho haddii xadgudub jinsiyeed kugu dhaco, waxaad la xiriiri kartaa khadka taleefonka ee tooska ah ee Xadgudubayada Jinsiga ah ee guryaha(RAINN) kanoo aad ka garaac karto 1-800-656-4673.
- **Caawimooyinka Dheeraadka ah:**
 - Haddii aan caawimo ubaahdo la xiriira dabogalka qof, booqo Xarunta Qaranka ee Dhibbanayaasha Danbiyada Dabogalka Xaruntooda Caawimoda <https://www.victimsofcrime.org/our-programs/stalking-resource-center>.
 - Si aad u hesho tusiyaha isbahaysiga maxalliga ah ee goobo kasta, booqo Isbahaysiga Qaranka ee Kahortagga Xadgudubayada Guriga <https://ncadv.org/state-coalitions>.



Adeegyada iyo Khayraadka

- **Khadka Caawimada ee Masiibada Dhibta leh** – 1 (800) 985-5990 – waa khad taleefon oo qaran kaasoo loogu talo galay in uu bixiyo la talin degdeg ah marka qalalaaso ku yimaado dadka iyagu markaasi dareemayo murugo la xiriira masiibo uu keenay banii'aadam ama si dabiici ah mid udhacdayba.
- **Khadka taleefonka ee Xadgudubyada Qaranka ee Guriga** – <https://www.thehotline.org> or 1 (800) 799-7233 or TTY 1 (800) 787-3224 – waa khad qarsoodi ah oo loogu talo galay qofkasta oo uu kadhaco xadgudub guriga gudihiisa, raadinaya xog, ama wax su'aal ah ka qaba dhinacyo aan fiicnayn oo cilaaqooyinkooda ah. Haddii aadan ugu hadli karin taleefon ka si aamin ah, u dir farrinta LOVEIS nambarka 1 (866) 331-9474 ama booqo barta internetka si aad khadka ugala hadashid.
- **211** – Garaac 211 taleefonka aad doonto ama booqo 211.org oo ku raadi deetana zip code ka - waa khad kugu xihdaaya caawimo degdeg ah iyo adeegyada kale ee ku taageeraaya bulshadaada gudaheeda. Dhammaan wicitaanadu waa qarsoodi, waxaana loo samayn karaa si qarsoodi, soo wucuhuna wuxuu codsan karaa adeega turjumaada kanoo loogu talo galay 180 luuqaadood.
- **Caymiska Shaqo la'aanta** – www.usa.gov/unemployment – ogoow inaad xaq uleedahay kaalmada shaqo la'aanta. Xeer federaal oo cusub ayaa wuxuu bixinayaa kaalmayn shaqo la'aan oo loogu talo galay dadka iyagu iskood ushaqaysta iyo shaqaalaha shaqooyinka ku meel gaarka ah, kanoo ugu daraya \$600 oo dheeraad ah kaalmaynta usbuucii la bixiyo, waxana ay ku darysaa 13 usbuuc oo kaalmayn ah tirada usbuucyada hadda gobolku bixiyo. Taa waxa dheer, gobolada waxa loo ogolyahay inay bixiyaan kaalmaynta shaqo la'aanta ee la xiriira COVID-19, si marka qofku ka tago shaqada sababtoo ah khattar uu ku qaadayo cudurka ama si uu udaryeelo xubin qoyska ka mid ah; loo shaqeeyaha si ku meel gaar ah u joojiyo shaqada COVID-19 awgii, tanoo ay macneheedu tahay in shaqaalaha aanay tagi karin shaqada; ama qof la kaarantiimeeyo laakiin uu bilaayo inuu shaqada ku noqdo marka kaarantiinku dhammaado.
- **Raadiyaha Kaalmaynta Shaqo la'aanta ee Career One Stop** – www.careeronestop.org/LocalHelp/UnemploymentBenefits – Ka war hel sida aad u dalban karto kaalmada shaqo la'aanta gobolkaaga.
- **Lacagyawga la bixinayo Hoos udhaca Dhaqaale awgii** – <https://www.irs.gov/coronavirus/get-my-payment> – Ka war hel haddii aad xaq u leedahay Lacagyawga la bixinayo Hoos udhaca Dhaqaale Awgii tanoo udhaxayso \$1200 ilaa \$2400 (waana ay ka badan kartaa dadka u qalma).
- **Diyaarinta Bilaa Cashuurta ah** – <https://irs.treasury.gov/freetaxprep> – Hel caawimo bilaash ah tanoo lagaa caawinayo inaad dalbato cashuurta, tanoo ay bixinayaan iskood u caawiyayaal tababaran.
- **Hay'adda Waxqabadka ee Bulshada** – <https://communityactionpartnership.com/find-a-cap/> – La xiriir Hay'adda Waxqabadka ee Bulshada si aad u ogaato adeegyada ay bixinayaan, sida caawimada degdegga ah ee lagaaga bixinayo kirada iyo baahiyaha kale ee guriga.
- **In lagaa caawiyayaal qarashaadka** – www.usa.gov/help-with-bills – Wax ka baro barnaamihyada dawlada si ay kaaga caawiyaan inaad bixiso qarashaadka tamarta gurigaiyo qarashyada kale.
- **Caawimada Ku meel gaarka ah ee Qoysaska Baahan (TANF)** – <https://www.benefits.gov/benefit/613>
- **Daryeelka carruurta** - <https://www.childcare.gov/covid-19> - waxay bixisaa xog ku saabsan daryeelka carruurta ee gobolkaaga, tanoo ay ka mid tahay in lagaa caawiyo inaad hesho daryeel carruureed.

- **Shaqooyinka sida degdegga ah loo heli karo COVID-19 awgii– <https://needajobnow.usnlx.com> – waa barta internetka ee lagu liisteeyo shaqooyinka shaqo geliyayaasha la hubaa ay udoonayaan qof buuxiya.**